# Guurka iyo Deynta Minnesota

Marriage and Debts in Minnesota

Warqadan xogta aruursan ahi waxa ay haysaa akhbaar ku saabsan guurka iyo deynta. Hadii aad deyn la wadaagto qof kale laakiin aydnaan is qabin qofkaa, eeg warqadayada xogta aruursan ee *Lamaanayaasha aan Is Qabin, Deynta, iyo Hantida*.


## Xilahayga lacag ayaa horey loogu lahaa ka hor intii anaan is guursan. Ma inaan bixiyaa deyntaa?

**Maya.** Mas'uul kama tihin deynta xilahaagu uu gashay adiga la'aantaa ka hor intii aydnaan is guursan. Arrintani waa dhab xataa hadii deyntu ay ku shaqo leedahay wax aad isticmaasho – sida hadii xilahaagu uu leeyahay guriga aad hadda ku nooshahay. Dhamaan wixii amaahda ah ee xilahaagu horey loogu lahaa kolkii aad isguursanayseen iyaga oo kaliya ayaa lagu leeyahay.

Si taa la mid ah weeye adiguna taadu. Deynta lagugu lahaa guurka ka hor adiga ayaa mas'uul ka ah, qofka aad isqabtaana laguma khasbi karo inuu bixiyo.

## Ciddee ka mas'uul ah deynta wadajirka la isugu leeyahay?

hadii adiga iyo xilahaagu aad wadajir deyn u qaadataan, labadiinuba mas'uul ayaad ka tihiin inaad dib u bixisaan. Cidii rabtaa lacagta ha isticmaasho ama ha qaadato alaabta deyntala qaatay lagu gatay. Hadii labada magacba ay ku wada qoran yihiin warqadaha deynta, labadiinuba mas'uul ayaad ka tihiin.



Hadii adiga iyo xilahaagu aad wadajir u qaadataan kaararka amaahda (credit card), labadiinuba mas'uul ayaad ka tihiin **dhamaan** wixii lagu gato kaararka. Waxa aad mas'uul ka tahay kaarka la wadaago wixii lagu gato xataa hadii aadan ku raacsanayn ama aadanba aqoon waxa kaarka lagu gatay.

Hase yeeshee, waxa la yiraa "isticmaalaha la ogol yahay" waa ay duwan tahay taa. Hadii aad haysto kaararka amaahda ka dibna aad qof ka dhigto "isticmaalaha la ogol yahay," kolkaa waxa aad mas'uul ka tahay deynta ee mas'uul kama tihid "isticmaalaha la ogol yahay."

Hadii aad is furtaan qofkii aad isqabteen labadiinuba waxa aad mas'uul ka tihiin deynta xataa hadii alaabta deynta lagu soo qaatay uu labadiina mid kaliya uu haysto.

Marba hadii magacaagu uu ku qoran yahay amaahda mas'uul ayaad ka tahay. Hadii qof kale aad la wadaagto uuna qofkaasi joojiyo bixinta amaahda, waa inaad sii wadaa inaad bixiso waxa oo dhan si aad u ilaaliso kiridhidkaaga. Waa aad isku dayi kartaa inaad lacagta aad dib uga hesho qofkii aad isqabi jirteen hadii warqadaha furiinka ee maxkamada ee kama dambaysta ahi ay leeyihiin in qofkii horey aad isu qabi jirteen ay wuxuun waajib ahi ka saaran yihiin amaahda. Meel dhigo cadeymaha sheegaya inaad amaahdii aad wada bixisay.

Hadii aysan waxba ka oran amaahda warqadaha amarka furiinku, waa aad isku dayi kartaa inaad dib u hesho qaarka mid ah lacagta hadii aad aado maxkamada dhexdhexaadinta, laakiin taasi waa ay adkaan kartaa in la sameeyo. Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Maxkamadaha Dacwadaha Madaniga*.

## Waa dayntee mida aad labadayadu mas'uulka ka nahay in kastoo hal qof uun magacii ay ku qoran tahay?

Kuwaasi waa qaarka mid ah deymaha la galo inta aad isqabtaan ee aad labadiinuba mas'uul ka tihiin – xataa hadii magaca qofka kale ee aad isqabtaan uun ay dayntu ku qoran tahay, xataa hadii aadan waxba ka ogeyn daynta.



- **Waxyaabaha Qoyska iyo Reerka Quseeya**

Labadiina qof ee isqabaa waxa aad mas'uul ka tihiin daynta loo galo waxyaabaha qoysku u baahan yahay inuu isticmaalo. Tusaale ahaan, hadii xilahaagu uu u soo qaado madbakh qoyskaaga, labadiinuba waxa aad mas'uul ka tihiin bixinta daynta mabbakha.

- **Khasiraadyada Caafimaadka**

Labadiinuba waxa aad mas'uul ka tihiin mid walba khasiraadyadiisa iyo kharashyadiisa caafimaad. Hadii xilahaaga lagu leeyahay lacag khasiraad caafimaad ah oo la galay intii aad isqabteen, sidoo kale iyana mas'uul baad ka tahay bixinta lacagtan.


- **Khasiraayada kale**

Labadiinuba waxa aad mas'uul ka tihiin deymaha kale ee ku qoran magaca xilagaaha kaliya hadii aad saxiixday heshiis qandaraas oo aad ku ogolaanayso inaad bixiso. Tan marmarka qaarkood waxaa loogu yeeraa wada-saxiixid. Hadii aadan doonayn inaad mas'uul ka noqoto ha ku qoran magacaaga deynta.

Waxaa jira marmar aysan ahayn inaad bixiso deyn aan adiga magacaagu ku qornayn. Tusaale ahaan, hadii xilahaagu uu amaah magaciisu uun uu ku qaato si uu ugu gato mooto, badanaa mas'uul kama tihin amaahdaa aan ka ahayn inaad doonayso inaad mootada mulkigeeda aad wax ku yeelato.

## Ma mas'uul baan ka ahay kharashaadka caafimaad iyo kuwa nolosha hadii aan qofka aan isqabto aan kala baxno?

Hadii xilahaagii aad kala baxdeen ama aynaan wada noolayn iminka, mas'uul kama tihid xilahaaga kharashyadiisa caafimaad ama kuwa gurigiisa ee soo baxa ka dib kolka aad kala baxdaan.



Laakiin wali waxa aad mas'uul ka tahay daymahii la galay intii aad wada noolaydeen. Tusaale ahaan, hadii uu xilahaagu uu u baahday daryeel caafimaad labo goor intii aad wada noolaydeen iyo hal mar intii aad kala baxdeen, waxaa dhici karta inaad mas'uu ka noqoto kharisaada koowaad, laakiin maya, aadan mas'uul ka noqon khasiraada labaad.

## Siddee ayaan ku cadeyn karaa inaan qofkii aan isqabnay aan kala baxnay?

Hadii aad haysato, waxa aad tusi kartaa maxkamada amarka kala bixida. Hadii kale, waxa aad isticmaali kartaa heshiisyada liiska guryaha ama khasiraadyada korontada si aad u cadeyso in adiga iyo xilahaagu aad labo guri oo kala duwan ku kala nooshihiin.

## Maxaa laga yeeli deyntayada aad wadajirka u galnay hadii aan is furno?

Kolka aad is furtaan, maxkamadu waxa ay soo saartaa amar maxkamadeed oo la yiraa "amarka furiinka." Amarka furiinka waxaa ku jira go'aanka xaakimka ee deynta. Xaakimka ayaa go'aansada cidda mas'uulka ka noqonaysa deynta. Tusaale ahaan, waxaa dhici karta inaad bixiso dhamaan deynta oo dhan ama qayb deynta magaca xilahaaga ku qoran., ama xaakimku waxa uu go'aansan karaa deynta in si is le'eg aad u bixisaan adinku.

**Laakiin Xusuusnow:** amarka furiinku waxa kaliya oo quseeyaa labadiina uun, ee ma quseeyo deyn-bixiyeyaasha. Hadii deyntu ay magacaaga ku qoran tahay, deyn-bixiyeyaashu waa ay ku dacweyn karaan adiga uun xataa hadii amarka furiinku uu leeyahay xilahaagii hore waa inuu bixiyo deynta.

Hadii aakhirka ay noqoto inaad bixiso deynta uu xaakimku yiri xilahaaga ayaa mas'uul ka ah, dib ugu noqo maxkamadii waydiisanaya in amarka maxkamada la oofiyo. Tus maxkamada nuqulka amarka furiiinka iyo cadeyn ah inaad adigu bixisay deynta. Rasiidyo ama jeegag la baajiyey ayaa ah cadeymo wacan.

## Ka waran haddii xilahaygu uu ku qaatay deyn magacayga aana waxba ka ogeyn?

Laga bilaabo bisha Janaayo 1, 2024, sharci cusub oo Minnesota soo saartay ayaa waxa uu leeyahay qaab caawin ah. Haddii aadan ogeyn in xilahaagu uu isticmaalay akhbaartaadda si uu ugu sameeyo wax sidda inuu ku soo furto kaararka deynta magacaaga AMA haddii uu xilahaagu uu kugu khasbay ama kugu jajuubay qaadashado deynta (arrinta waxaa loogu yeeraa tacadiga dhanka dhaqaalaha) hadda waxaa jira jid aad ku waydiisan karto maxkamad inaysan kugu khasbin inaad bixiso amaahdaa. Waa khasab inaad tahay dhibane tacadi qoyska dhexdiisa ah

loo geystay, dhibane khashkhashaad, ama tahriibin dhanka galmada ama shaqadda ah loo geystay si aad u awoodo inaad codsato cafiskan.

Waa inaad ku ogaysiiso amaah-bixiyeesha qoraal aadna siiso qoraaladda sharxaya xaaladda aadna u cadeyso sababta aadan mas'uulka uga ahayn amaahda. Kuwaasi waxa ay noqon karaan waxyaabaha sidda:

- warbixin booliis
- warbixin musuq/xatooyo magac ka hadlaysa
- amar furiin oo maxkamadeed, ama
- oraah qoraal ah oo dhaar ah oo aad adigu siinayso amaah-bixiyaha

Waxa aad waydiisan kartaa maxkamadda inay kaa masaabaxdo deynta ama ay xukunto in xilahaahu uu mas'uul ka yahay bixinta amaahda. Waxaa aad siddoo kale ka codsan kartaa in galka dacwaddu uu noqdo mid qarsoodi ah haddii aad u baahan tahay inaad ka amaan gasho tacadi mustaqbalka laguu geysto.

Sharcigani ma quseeyo deynta curaarta leh.  Deynta curaarta lahi waa deynta leh 'rahmadda." Sidda gaari dib loola noqon karo haddii aadan bixinta lacagta lagu soo qaatay ama guri lala wareegi karo. Siddoo kale sharcigani kaliya waxa uu quseeyaa deymaha cusub ee la qaatay ka dib Janaayo 1, 2024. Uma isticmaali kartid sharcigan deymahii hore oo xilligaa ka horeeyey.

## Furiinka iyo Hantida Dhulka

Xaakimku waxaa kale oo uu go'aansan karaa waxa laga yeeli "hantida dhulka" ee adiga iyo xilahaagu aad wadajirka u wada gadateen xilligii aad isqabteen. Hantida Dhulku waa dhul iyo dhismayaal, sida guri oo kale. Labadiinuba waxa aad u leedihiin xaq ugu yaraan inaad heshaan qayb wixii hanti dhul ee la gatay intii guurku uu jiray, **xataa hadii hal magac ay ku qoran tahay.** Hadii aad doonayso inaad hantida dhulka aad la harto xaakimku waxaa dhici kara inuu ka dhigo mas'uuliyadaada bixinta amaahda, canshuurta iyo dayactirka guriga.

Ka hor inta aadan saxiixan warqada furiinka, hubi inaad fahamto waxa ay tahay lacagta lagu leeyahay wixii hanto dhul ah ee ku qoran xilahaaga macagiisa uun. Adiga iyo xilahaagu waxa aad ku heshiin kartaan cidda la haraysa xaquuqda mulkiga hantida dhulka xilliga furiinka. Hadii aydnaan ku heshiin karin adinku xaakimka ayaa go'aanka kama dambaysta ah ee arrinta gaaraya.



Hadii aadan doonayn inaad mas'uul ka noqoto lacagta dhulka lagu leeyahay, waxaa dhici karta inaadan doonan inaad sheegato saamigaaga dhulka. U sheeg xaakimka. Adiga iyo xilahaaga waxa aad ku heshiin kartaan in asaga ama iyadu ay la harto dhamaan xuquuqda mulkiga hantida xilliga furiin. Hadii aydnaan ku heshiin karin adinku xaakimka ayaa go'aanka kama dambaysta ah ee arrinta gaaraya.

## Ka waran hadii uu amaah-bixiyahu uu yiraa waa inaad anigu bixiyo deynta xilahayga?

Hadii uu amaah-bixiye kula soo xiriiro oo kugu yiraa waa inaad bixiso khasiraad magaca xilahaaga lagu galay, aysana ahayn deyn reerku wada galay ama lacag kharash caafimaad ah oo la galay xilligii guurku uu jiray, kolkaa u sheeg amaah-bixiyaha sharciga Minnesota waxa uu yiraa ma aha inaad bixiso deymaha caynkaa ah. Sida ugu fiican ee naftaada looga dhowro arrimahan oo kale waa inaad hubiso inaad ku qorto dhamaan wixii deyn ah warqadaha furiinka. Hubi in amarka furiinka ee kama dambaysta ahi uu qoro kuligood uuna cadeeyo cidda mas'uulka ka ah.

**Ka feejignow:** Hadii hal mar aad bixiso khasiraad aan magacaaga ku qornayn kolkaa, waxaa dhici karta in mas'uuliyadaada laga dhigo dhamaan deynta oo dhan ha dhow.

Goboladu waxa ay leeyihiin xeerar kala duwan oo arrintan quseeya. Khasiraad soo qaade gobol kale joogaa waa dhici karta inuusan aqoon xeerarka MInnesota. Waydii amaah-bixiyaha ama kharisaad soo qaadaha inay kuu soo diraan cadeyn ah inaad mas'uul ka tahay amaahda. Cadeyntaasi waxa ay noqon kartaa kharisaad muujinaya in deyntu ay tahay mid daryeel caafimaad ah ama mid lagu gatay shay qoysku uu u baahnaa. Cadeynta waxay kaloo noqon kartaa qoraal aad adigu saxiixday oo aad ku ogolaatay inaad bixiso deynta.


Hadii adiga ciddi ku dacaweeyso, hubi inaad ka "Jawaabto" warqadaha maxkamada. Eeg warqadayada Xogta Aruursan ee *Maxaan Yeelayaa Haddii La I Dacweeyo*.

Iska indho-tirida warqadahu waxa ay keeni karaan amar maxkamadeed oo oranaya waa inaad bixiso deynta. U sheeg maxkamada sharciga Minnesota una sharax in deynta xilahaagu aysan la xiriirin kharashaad reer ama mid caafimaad ama in aadan la noolayn xilahaaga kolka deynta la galay.

Waxa aad ka sameyn kartaa "Jawaab" Khadka ee ah www.lawhelpmn.org/forms *(ingiriisi kaliya)*

- → Hel "Debts, Fees, Deposits" *(Deynta, Khidmadaha iyo Dabaajiyada)*
- → Riix "Answer a "Summons and Complaint - Debt Collector Lawsuits" *(Jawaabta U Yeerida iyo Ashtakada – Dacwada Deyn Qaadaha)*

## Ka waran hadii deyntu ay ahayd ka hor intii aanan u soo guurin Minnesota?



Hadii aad ku noolayd gobol kale, sharciga Minnesota ma go'aansado cidda mas'uulka ka ah deynta la galay iyadoo meel kale la joogo. Eeg sharciyada gobolka aad ka soo guurtay si aad u oogaato inaad mas'uul ka tahay wax deyn ah oo xilahaagu galay adigoo ku nool meel kale. Waa lagugu khasbi karaa inaad bixiso deynta adigoo halkan Minnesota ku sugan hadii maxkamad gobol kale ahi ay xukunto in labadiinaba la idinku leeyahay khasiraad gobolka dibadiisa ka dhacday.

Xafido diiwaanada dhaqaalahaaga oo buuxa. La soco waxa hantida ah ee aad leedahay iyo waxa lagugu leeyahay ama aan lagugu lahayn. Si fiican u xafididdu waxa ay kaa caawin kartaa inaad deymahaaga aad xakamayso, waxay sidoo kale kaa caawin kartaa adiga inaad tusto deyn-bixiyeyaasha deymaha aadan shakhsiyan adigu mas'uulka ka ahayn.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**